

Xeer Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga - 8 Janaayo 1963, lamba. 2

Baabi'inta iyo lacageynta Wakaladda "E.N.A.M."

Wasiirka

Markuu arkay qodobada 77 iyo 33 ee Dastuurka;

Markuu arkay qod. 16 oo ka mid ah Xeer Sharci. 9-11-1957, lamba. 10 oo loo beddelay sharci 14-1-1958, lamba. 5;

Markuu tixgeliyay baahida loo qabo in la baabi'yo in la kala dirio Wakaladda ENAM (Ente Ammassi iyo Motoaratura) iyo magacaabista Guddomiyaha kala diraaqo;

Markuu dhageestay Golaha Wasiirada;

Markuu tixgeliyay talada Wasiirka Maaliyadda;

Wuxuu xeeriyay

Laga bilaabo 10 Janaayo 1963, waxaa la baabi'yay Wakaaladda ENAM (Ente Ammassi iyo Motoaratura) waxaana la amray in la lacageeyo.

Si loo fuliyo dhammaan falalka la xiriiro baabi'inta iyo lacageynta waxaa loo magacaabay Guddoomiye, Rag. Martini Gaetano.

Tilmaamaha ku habboon ayaa la siin doonaa ka dib marka la soo bandhigo miisaaniyada kama dambaysta ah ee lacageynta iyo sida loo isticmaalayo hantida si loo daboolo khasaaraha.

Muqdisho, 8 Janaayo, 1963.

Wasiirka ku meel gaarka ah
Abdulcadir Mohamed Aden

Wasiirka Maaliyada

Abdulcadir Mohamed Aden

Arkay oo ka diiwaan gashan - Reg. lamba. 1 - xaashida lamba. 2.

Muqdisho, 10 Janaayo, 1963.

Hantidhowraha Guud: **Ali Ahemed Omar**